



# UNIVERSITY OF MINNESOTA ROCHESTER

## WAX-YAABAHA LAGA RABO ARDEYGA SI LOOGU OGOLAADO JAAMACADDA

**Waxaan kuugu Hambalyeyneynaa in lagu ogolaaday Jaamacadda Minnesota qaybteeda ku taala Rochester!** Raac Qodobadaan hoos ku qoran, kuwaas oo ku gaarsiinaya, qaabkii aad isu diiwaangalin lahayed. Si taxadar leh u hubi in aadan ka daahin xilliga ugu danbeeya ee isdiiwaangalinta la ogolyahay ama maalinta Kama danbeysta ah, oo ah in aad hesho warbixin caddeyneysa ogolaansha la xiriira lacagta deeqda ah lagu bixiyo waxbarashada iyo gurigii aad degi lahayedba, kuwaas oo loo yaqaano (Confirmation, financial aid and housing). Fadla la xiriir xafiiska ogolaanshaha waxbarashada haddii aad wax su'aal ah qabtid, adoo soo wac taleefanka 507 – 258- 8686 ama barta internetka oo ah [applyumr@r.umn.edu](mailto:applyumr@r.umn.edu)

### ❑ HUBSO IN AY ISDIIWAANGALINTU KUU DHAMEYSTIRANTAHAY IYO IN KALE

Ka hubso isdiiwaangalintaada, barta internetka ee ah [r.umn.edu/admitted](http://r.umn.edu/admitted) laga bilaabo 1da Bisha Maajo ee 2020ka. Waxaa kale oo aad halkaas ka heli kartaa wixii aad sameyn lahayed mustaqbalka si aad u dhameystirtid isdiiwaangalintaada

### ❑ SAXIIX OO ISKU QOR DIIWAANKA OGOLANSHA KULAMADA ARDEYDA

Waxaa lagugu casuumayaa in aad ka qaybgasho mid ka mid ah malinta loo yaqaano (UMR'S VIP), Taas oo lagu kulminaayo ardeyda la ogolaaday xilliga guga ah ee 2020ka ama loo yaqaano (spring 2020). Kani waxuu kaa caawinayaa in aad heshid fursad aad ku kalabaratiid oo lagugu soo wareejiyo jaamacadda gudaheeda ama Kanbaska. Booqo barta internetka oo ah [r.umn.edu/VIP-Day](http://r.umn.edu/VIP-Day) si aad u saxiixdo kaqaybnoqoshada mid ka mid ah booqashooyinka! (Taasi qasab ma ah).

### ❑ SAXII OO ISKU QOR WAXA LOO YAQAANO (RABTARKA CUSUB) AMA (NEW RAPTOR) SI AAD U HESHID TALOOYINKA ISDIIWAANGALINTA

Talooyinka iyo isdiiwaangalinta ee la siinayo ardeyga cusub, waxay dhacaan oo ay yihiin xilliga aad la kulmidoontid ardeyda kale ee UMR dhigata, isku qor maadooyinka (Courses) si aad u heshid kaalmada kharashka waxbarashada ee loo yaqaano (Financial aid) iyo si aad wax badan uga ogaato goobta guud ahaan Jaamacadda ama Kanbaska, si aad isugu diyaarisid xilliga xiga ee Xagaaga ah ama loo yaqaano (Fall) ee UMR. Fadlan soo booqo barta internetka ee ah [r.umn.edu/admitted](http://r.umn.edu/admitted) si aad isu diiwaangalisid. Joogitaanka iyo ka qaybgalka fasaladu waa qasab, maalmahana loo jaan gooyey ama loo qoondeeyey.





# UNIVERSITY OF MINNESOTA ROCHESTER

## ❑ CUSBOONEYSIINTA EMAILKAAGA EE UMR

Fadlan booqo barta internetka ee ah [r.umn.edu/initiate](https://r.umn.edu/initiate) kadibna raac macluumaadka lagu siiyey. Haddii aad u baahatid wax kaalmo ama gargaaar ah oo ku saabsan cusbooneysiinta emailkaaga, la soo xiriir xarunta macluumaadka ardeyda oo taleefankeedu yahay 507-258-8457

## ❑ SIDA LOO CODSADO LACAGTA KAALMADA WAXBARSHADA EE LOO YAQAANO (FINANCIAL AID)

Buuxi foomka FAFSA. Kuna soodir barta internetka ee ([fafsa.ed.gov](https://fafsa.ed.gov)), kaas oo diyaar noqodoona 1da Bisha Octob ee Xilliga qaboobaha (winter) inta aan la gaarin isdiiwaangalinta. Waxaan muhiimada saarnay oo ay noqondoontaa maalinta Kama danbeysta ah (deadline) waa 1da Bisha Maarso, ama (March) ee xilliga guga (spring) danbe ah inta ka horeysa isdiwaangalinta. Fadlan isticmaal coodka Iskuulka (school code), kaas oo ah: 003969, oo la mid ah Kan Jaamacadda Minnesota qaybteeda Magaalooyinka mataanaha ah. Fadlan soo booqo barta internetka ee loo yaqaano (one stop website) oo ah [onestop.r.umn.edu](https://onestop.r.umn.edu) haddii aad u baahatid wax faahfaahin dheeraad ah.

## ❑ SAXIIXA ISDIIWAANGALINTA DAGAANKA GURYAHA

Soo booqo bogga guriyenta oo ah [r.umn.edu/housing](https://r.umn.edu/housing) si aad isu diiwaangalisid. Foomamka guriyenta waxaa uu diyaar noqondoona xilliga Xaggaaga ah ee loo yaqaano (fall) oo ah 2019ka, waxuuna ku ekaa oo ahayed in la soodiro 1da Bishii Maayo ama (May)

## ❑ NOO SOODIR SHAHAADADA WAXBARASHADA EE RASMIGA AH (YOUR FINAL TRANSCRIPT)

Hubso in aad codsatid shahaadada waxbarashadaada rasmiga ah (Final transcript) oo waliba aad u soo dirtid xafiiskanaga inta lagu jiro xilliga kuleylaha ee loo yaqaano (summer) 2020ka, inta aanay fasaladu bilaabanin ka hor. Aad bay muhiim u tahay in aad si guul leh u dhameysatid maadooyinkaaga kuugu jira jadwalka foomkaaga codsiga waxbarashada. Haddii aad wax ka baddashid manhajkaaga (Curriculum) waxbarsho waxay raad ku yeelan kartaa xaalada ogolaanshaaga.

## ❑ KU SOO BIIR OO KA MID NOQO UMR FASALADA (CLASS) 2024KA EE BARTA AANU KU LEENAHAY KOOX AHAAN FACEBUUGA

Aadoo baaris ku sameynaya [@UMRCLASSOF2024](https://www.facebook.com/UMRCLASSOF2024) Si aad ula kulanto ardeyda kale ee aad isku fasalka tihin, baro barmaamijyada soo socda oo waliba u diyaargarow in aad ku soo biirtid UMR xilliga Xagaaga (fall) ee 2020ka!

